Soo koobista barnaamijka doorashada gobollada ee SDP

Tallaabada xigta ee nololwanaagga

Sheekada Finland waa sheeko ku saabsan koritaanka waddan yar oo faqri ah oo ka mid ah bulshada dunida ugu horumarsan, kaas oo ay ku nool yihiin dadka dunida ugu farxadda badan. Sheekadaas waxaa lagu dhisay waddan nololwanaagsan oo xooggan leh, taas oo suuragelisay dhalashada aqoon, hindisooyin cusub iyo hodantinimo. Waa sheeko ku saabsan kalsooni, ku dadaalista sinnaanta iyo xaqa uu qof kasta u leeyahay in uu saamayn ku yeesho noloshiisa iyo bulshada.

Sooshal dimuquraadigu waxay nololwanaagga Finland dhisayeen wax ka badan 120 sanno. Nololwanaaggu wuxuu nooga yimaadaa nololmaalmeed shaqeynaya, adeegyo lagu kalsoon yahay, furfrunaanta bulshada iyo dimuquraaddinimada. Iyo in qofkasta uu hawshaas qayb ka yahay.

Nololmaalmeedka shaqaynaya wuxuu sugaa nolol wanaagsan. Waxay u baahantahay kalsooni ah, in bulshadu ay qaaddo qof kasta oo innaga mid ah, si haddii loo baahdo aan ugu gudubno daryeel, u helno taageeri iyo ammaan bulshaduna ay noo xajin karto. Waddanka nolosha wanaagsan wuxuu sameeyaa shabakadda ammaanka ee dadka Finland deggan, taas oo ah mid xajin karta nololmaalmeedka iyo weliba wakhtiyada xasaradaha.

Si kastaba ha ahaatee nololwanaagga iyo hodontinimadu si siman uma qaybsamaan. Farqiyada nololwanaaggu waxay ahaayeen kuwa sannadba sannadka ka dambeeya sii kordhaya. Cunug kasta oo dhasha, waayeelka xannaanada u baahan ama qofka ku jira da'da shaqada ee caawimaadda raadinaya ma ahan kuwa ku jira xaalad simman. Sababtan darteed ayaan dib u habayn ugu samaynaynaa sooshalka iyo caafimaadka. Shaqo toban sano ka badan socotay kaddib dib u habaynta waa ay hirgeleysaa aagagga nololwanaagguna waxay shaqadooda billaabayaan billowga sannadka 2023. Dib u habayntu waa muhiim, si xaqa loo simanyahay ee uu qofka kasta u leeyahay nololwanaaggu uu Finland oo dhan uga hirgelo.

Haddii aan nahay sooshal dimuquraadiga adeegyyada loo simanyahay, la heli karo islamarkaasna tayada leh waa furaha horumarka qarankeenna ee mustaqbalka. Nololwanaagga loo simanyahay wuxuu abuuraa kalsooni bulshadeed, ammaan iyo bulsho shaqaysa. Qof kasta oo naga mid ah wuxuu xaq u leeyahay adeegyada sooshalka iyo caafimaadka oo tayo leh iyo waxqabadka badbaadada oo aan ku xirnayn deegaanka uu degganyahay, isagoo ku helaya labada luqadood ee ummadda.

Adeegyada waa in la helaa marka loo baahanyahay, iiyagoo si fudud loo helayo meel dadka u dhowna laga helayo. Sooshal dimuquraadigu waxay doonayaan, in qof kasta oo Finland deggan uu aamini karo in, ambalaaska iyo baabuurka dabdamisku ay yimaadaan marka loo baahdo, in daryeelka caafimaadka la helayo haddii la qabo calool xanuun ama dhibaatooyinka dhinaca caafimaadka dhimirka ah, iyo in taageero iyo talaba la helayo marka loo baahanyahay.

Doorashooyinka ugu horreeya ee gobollada ee la qabanqaabinayo Janaato 2022 waa kuwa muhiimad gaar ah leh, sababtoo ah waxaa lagu dooranayaa golayaal soonaha nololwanaagga u samaynaya salka iyo jihada mustaqbalka ee soonaha nololwanaagga. Golayaasha ugu horreeya waxay go'aan ka gaarayaa shabakadda adeegga, waxyaabaha ay adeegyadu ka kooban yihiin iyo weliba kaalinta iyo qayb ka ahaanshaha shaqaalaha.

- ***Sanna Marin, Guddoomiyaha xisbiga SDP***

Sooshal dimuquraadigu waxay soonaha nololwanaagga ee kasta ka qabanayaan hawl ah, in adeegyada sooshalka iyo daryeelka caafimaadku ay fiicnaadaan. Waxaan doonaynaa in dadka Finland deggan ay sidi hore si ka fiican u sinnaadaan, u caafimaadqabaan xaaladdooduna u wanaagsanaato.

SDP waa ay arrin ay rabto, in soone nololwanaag oo kasta oo Finland ku yaal

1. Uu helitaanka adeegyada sooshalka iyo caafimaadku fiicnaado. Adeegyada laga helo hal meel wadajirna ay u shaqeeyaan. Goobaha adeegyadu ay badan yihiin ayna ku yaalaan meelo u dhow goobaha sida fudud looga helo gaadiidka. Lacagaha macaamiisha laga qaado ma ahan in ay hor-istaagaan helitaanka caawimaadda iyo in wakhtiga fog la dhimo ama meesha laga saaro lacagaha macaamiisha laga qaado ee daryeelka caafimaadka. Waxaan doonaynaa in aan sugno adeegyada dadweynaha oo xooggan oo shaqaynaya, kuwaas oo ka jawaabaha baahiyaha shaqsiyeed. Ururada iyo shirkaduhu waxay dhammaystirayaan bixinta adeegyada.

2. Waxaa la sugayaa daryeel wakhtigiisa lagu helo. Soonayaasha nololwanaagga waxaa laga billaabayaa isticmaalka ballanqaad daryeel, kaas oo daboolaya daryeelka caafimaadka ee aasaasiga ah, adeegyada caafimaadka dhimirka iyo daryeelka caafimaadka afka.

3. Waxaa la xoojinayaa kaalinta shaqaalaha iyo nololwanaagga. Adeegyada tayada leh iyo ballan-qaadka daryeelka waxay ku hirgelayaan shaqaale aqoon leh oo nolol wanaagsan haysta. Dhammaan soonayaasha nololwanaagga waxaa laga horumarnayaa hoggaaminta waxaana la abuurayaa hababka saamayn ku yeelashada shaqada la hayo waxaana sidoo kale la wanaajinayaa xaaladaha shaqo, waxaana sidoo kale la siinayaa fursado uu qofku aqoontiisa xirfadeed ku horumariyo. Waa in sidoo kale wax laga qabtaa shaqaalo yaraanta.

4. Waxaa la sugayaa daryeelka wanaagsan ee waayeelka. Adeegyada shakhsiga ah waxay ku salaysnaanayaan qiimeynta baahida adeegga, adeegga wanaagsanna waxaa lagu sugayaa shaqaale ku filan oo loogu talaggalay, aqoon xirfado badan iyo qaab-dhismeedyo shaqo oo si cad loogu heshiiyay. Shaqaalaha loogu talaggalay ee ku filan waa in loo sugaa qaybaha daryeelka iyo weliba daryeelka guryaha. Adeegyada guryaha la geynayo waa in noocyadooda la badiyaa, waxqabad maalmeedka waa in la ballaariyaa si uu u gaaro dad badan oo da' ah adeegyadana waa lagu kaalmeeyaa ehel daryeelista.

5. Waxaa la hagaajinayaa adeegyada qoysaska ee ka hortagga, lacagta la'aanta ah ee sida fudud lagu helo. Adeegyada carruurta iyo qoysaska waxaa laga dhigayaa xirfado dhinacyo badan oo shaqaynaya, kaas oo nololmaalmeedka ku taageeraya carruurta, dhallinyarada iyo qoysaska. Adeegyada guryaha ee qoysaska carruurta leh waa la kordhinayaa. Adeegyada caafimaadka iyo daryeelka bulshada (sote) ee carruurta waa si fudud loogu bixiyaa dugsiyada iyo goobaha waxbarashada. Adeegyo dhammaystiran oo xooggan ayaa badbaadada carruurta loo dhisayaa

6. Adeegyada waxaa qorshayntooda iyo horumarintooda lagu salaynayaa aragtida dadka isticmaala dadkaasna waa la dhegeysanayaa. Nidaamyada wakhti qabsashada, la xiriiridda iyo talabixintuba waa in ay noqdaan kuwa fudud, aan dhib lahayn oo degdeg ah. Adeegayda waa in la helaa habeennadi iyo dhammaadka todobaadyada. Cabirka tayada waxaa lagu salaynayaa waayo-aragnimada isticmaala adeegga.

7. Waxaa la suuragelinayaa isticmaalka teknoolojiyada cusub. Dhijitaal ka digidda iyo isticmaalka teknoolojiyada waa in loo horumariyaa hab ah, in tayada, isticmaalka iyo xannibaad la'aanta adeegyadu ay fiicnaadaan. Adeegyada lagu bixiyo goobuhu waa in ay barbar-socdaan adeegyada dijitaalka ah, si qof kasta uu u helo adeegga uu u baahan yahay.

8. Waxaa la sugayaa wadashaqeynta dhow ee u dhexeysa adeegga badbaadada iyo adeegyga sooshalka iyo caafimaadka gaar ahaan marka lagu jiro gurmadka degdegga ah. Soonaha nololwanaagga waa in loo qoraa xirfadlaal ku filan oo ka shaqeeya hawlaha badbaadada. Shaqaalaha waa in la dhegeystaa gacan ku haynta

aqoontoodana waa in la xaqiijiyaa. Xarumaha ciidamada dabdamiska ee heshiishka ku jira waa la sugaa marka dibuhabaynta la samaynayo.

Go'aan gaarayaasha soonayaasha nololwanaagga ee sida dimuquraadiga ah loo doortay ee mas'uuliyiinta ah ayaa waxay dejinayaa hadafyo soonaha oo dhan u wanaagsan. Hogaanka la doortay ayaa mas'uul ka ah, in adeegyadu ay ka jawaabaan baahiyaha noocyada badan ee dadka soonaha deggan.